
# DHEERAAD AH PORTLAND!

VOTE NOV. 6

# WAY FUDUD DAHAY

## SIDA LOO AKHRIYO HAGAHAN

*Maine 2018 Doorashada Guud - November 6, 2018*



## Gudaha:


**3** Ku Saabsan Hagahan

**5** Golaha Gobolka Maine

**6** Wakiilka Gobolka Maine

**11** Gudoomiyaha Degmada

**13** Xeer ilaaliyaha Degmada

**14** Garsooraha Maxkamada/Askariga Sheriff

**15** Golaha Magaalada Portland

**17** Gudiga Dugsiyada Portland

**19** Biyaha Degaanka Portland

**20** Golaha Magaalada Jasiirada Peaks

**21** Mashruuca Muwaadiniinta


***Hagahan KALIYA ayaa ka kooban macluumaadka ku saabsan musharixiinta degaanka iyo su'aalaha ku saabsan codbixinta ee PORTLAND.***

*Macluumaadka ku saabsan musharixiinta gobolka iyo su'aalaha - sida musharixiinta gudoomiyaha gobolka, Wakiilka Sanatka Maraykanka ama Wakiilka Aqalka - soo qaado Hagaha Doorashada Gobolka.*


LWV
LEAGUE OF WOMEN VOTERS®
OF MAINE
EDUCATION FUND

# ★ Ku Saabsan Hagahan

Hagahan codbixinta waxaa loogu tala galay dadka kunool kana codbixiya magaalada Portland. Hagahan waxaa ku jira macluumaad ah musharixiinta iyo su'aalo ku saabsan codbixinta Portland.

***Codbixiyayaasha Portland waxay sidoo kale u codeeyaan musharixiinta gobolka iyo su'aalaha codbixinta. Macluumaadka ku saabsan doorashooyinkaasi waxay ku jiraan nidaamkayaga Hagaha -Si- fudud U Akhri ee Musharixiinta Arimaha Gobolka oo Dhan.***

Doorka haweenka codbixiyayaasha gobolka Maine sanduuqa dhaqaalaha waxbarashadu waxay ku faraxsan yihiin in ay u qaybiyaan 10,000 nuqul oo ah hagahan codbixiyeyaasha ee doorashada guud 2018 ee Portland.

**Macluumaadkani waa mid dhinacna aan raac sanayn.** Taas macnaheedu waa macluumaadka hagahan ma aha mid aqbala inuu taageero musharax, xisbi siyaasadeed ama su'aalaha codbixinta.

Dhamaan musharaxiinta ayaa soo diyaarsada qoraaladooda ma taabtaan Doorka Horyaalka Haweenka Cod bixiyayaasha Maine ee Sanduuqa Waxbarashadu . Ma jiraan hadalo micnaynaya musharixiinta ama su'aalaha cod bixinta oo muujinaya aragtiyada Ururka ama is kaashiga qaybinta, kuwaas oo ay ku jiraan dugsiyada oo dhan, maktabadaha, ururada aan macaash doonka ahayn, ama hay'adaha.

★ **Su'aalo & Nuqulada Hagahan**
Hadii aad qabtid su'aalo, soo was 207-622-0256 ext. 2
ama email voterguide@lwvme.org

Waxaad kaloo ka heli kartaa hagahan internetka lwvme.org

# ★ Golaha Gobolka Maine

Gobolka Maine Seterada waxay qoraan ayna ansaxiyaan sharciyada gobolka Maine. Waxay shaqadan la wadaagaan wakiilada xubnaha aqalka. Senetaradu waxan ansixiyaan wakaaladaha gobolka iyo garsoorayaasha gobolka ee uu soo doortay Gudoomiyaha gobolku.

Gobolka Maine wuxuu ukala qaybsamaa 35 degmo. Degmooyinku waxay ku salaysan yihiin dadka degan degmo kasta. Codbixiyayaashu waxay dooran karaan xubnaha golaha gobolka ilaa afar jeer oo ah sided sano marka la isu geeyo. Senetaradu waa inay 25 jir yihiin, muwaadin maraykan ah ugu yaraan shan sano. Waa inuu ku noolyahay degmadiisa ugu yaraan sadexdii bilood ee la soo dhaafay.

**Mudada (sanadka doorashada soo socota):** 2 sano

**Mushahaarka:** $14,271 (sanadka ugu horeeya),
$10,158 (sanadka labaaad)

## ★ Musharaxiinta — Degmada 27

☑ **Dhaqanka Codbixita**



Xisbiga Madaxa Banana Musharaxa

### Crystal Canney

**Shaqada Hada:** Hohgaamiyaha The Knight Canney Group
**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** VoteCanney.com

**War bixinta Shakhsiga:** "Waxaa jira waxyaabo badan oo saameyn ku leh gobolkeena ayaa ka qayb noqotay kala qaybiska sii kordhaya. Waxaan ahaa wariye weydiinayey su'aalo adag iyo kooxda hogaanka ee Gudoomiyaha Gobalka Baldacci iyo Senator Angus King. Ka shaqeynta Augusta, matelida dadka, waxay ii noqon laheyd Sharaf."

**Khibradaha:** "Waxaan Gudoomiye Beldacci anigoo ahaa gaasimaha isgaarsiinta iyo Kaaliyaha Gudoomiyaha Waaxda Maamulka iyo Maaliyada. Miisaaniyadu waa dukumiintiga siyaasadeed ee ugu weyn gobolka. Waxaan sidoo kale maamule 2 ganacsi oo yaryar waxaan fahan sanahay in la kordhiyo baahida loo qabo ganacsiga yaryar ee Maine."

**Hadafyada:**
- Mudnaanta daryeelka caafimaadka
- Hubi nabadgelyo ku haboon oo ah kuwa ugu nugul - iyada oo xooga la saarayo caruurtayada iyo waayeelka
- Hubi in dhaqaaluhu uu ka wada faa'iidaysan karaan dadku



Musharaxa Xisbiga Dimuquraadiga

### Benjamin Chipman

**Shaqada Hada:** Ganacsade Yar
**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** VoteChipman.com

**War bixinta Shakhsiga:** "Waa in aan hubino in qof kasta uu helayo daryeel caafimaad, waxbarasho tayo leh, iyo fursado dhaqaale, waxaana u baahanahay inaan hubino in qofna uusan tagin isaga oo aan baahidiisa la daboolin. Waxaan jeclaan lahaa inaan sii wado isticmaalka khibradeyda iyo xirfadaha hogaaminta si aan u gudbino natiijooyinka kuwan iyo arimaha kale ee muhiim ka ah."

**Khibradaha:** "Waxaan leeyahay in ka badan 20 sano oo waayo-aragnimo siyaasadeed ee dadweynaha oo aan u doodayey arimaha muhiimka ah ee Portland iyo heer gobol. Waxaa la ii doortay inaan u shaqeeyo Guddiga Xeerka Portland 2009-2010, Wakiilka Gobolka 2010-2016, iyo Senatorka 2016-ka."

**Hadafyada:**
- Balaarinta helitaanka daryeelka caafimaadka iyo abuuritaanka nidaam qof walba daboolaya caafimaadkiisa
- Abuuris dhaqaale u shaqeeya qof walba
- Xushmeynta cod-bixiyeyaasha iyadoo la difaacayo hirgelinta sharciyada loo maro sanduuqa cod-bixinta

## ★ Musharaxiinta — Degmada 28

**Kaliya Musharax**



Musharaxa Xisbiga Dimuquraadiga

### Heather Sanborn

**Shaqada Hada:** La-la haansho Rising Tide Brewing Company
**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** HeatherSanbornForMaine.com

**War bixinta Shakhsiga:** "Waxaan rabaa in aan Maine ka dhigo meel ay caruurteenu awoodaan inay ku kobcaan - helayaan waxbarasho heer caalami ah, helitaanka shaqo fiican, iyo qoysaskooda. Waxaan arkayaa mustaqbal iftiin ah Maine waxaana ka shaqeynayaa in aan dejino qorshayaasha aan u baahanahay inaan halkaa ku gaarno."

**Khibradaha:** "Waxaan u adeegay Aqalka Maine sidii aan ugu hadli lahaa daryeelka caafimaadka iyo siyaasada tamarta la cusbooneysiin karo. Waxa kale oo aan haystaa waayo-aragnimo macalin dugsi, qareen, ganacsade yar, iyo hooyo waxaana miiska Augusta keenayaa khibrada haygaas."

**Hadafyada:**
- In ay helaan reer Maine daryeelka caafimaadka oo tayo sare leh
- U doodista xalalka tamarta nadiifta ah, sida tamarta qoraxda iyo korontada
- Hubinta in dawladu ay bixiso qayb cadaalad ah ee kharashka waxbarashada dadweynaha

# ★ Wakiilka Gobolka Maine

Xubnaha golaha wakiilada ee Maine waxay qoraan ansaxiyaana sharciyada gobolka Maine. Waxay la wadaagaan shaqadan Senetarada Maine. Sharciyada kor u qaada lacagaha lagu horumariyo arimaha dawlada waxay kasoo bilaabmaan aqalka wakiilada waana inay ansixiyaan Seneteradu.

Gobolka Maine wuxuu u kala qaybsan yahay 151 degmooyin oo shari dejiya. Degmooyinkaas waxay ku salaysan yihiin dadka ku nool degmadaas. Codbixiyayaashu waxay dooran karaan xubnaha wakiilada aqalka ee gobolka Maine ilaa afar sano isu geyn sided sano. Wakiiladu waa inay 21 jir yihiin ahna muwaadin dalka Maraykanka ugu yaraan shan sano. Waa inay ku nool yihiin ugu yaraan hal sano degmadooda ugu yaraan sadex bilood.

**Mudada (sanadka doorashada soo socota):** 2 sano

**Mushahaarka:** $14,271 (sanadka ugu horeeya),
$10,158 (sanadka labaad)

## ★ Musharaxiinta — Degmada 36

☑ **Dhaqanka Codbixita**



Musharaxa Xisbiga Dimuquraadiga

### Michael Brennan

**Shaqada Hada:** Agaasimaha Mashruuca Gaarka ah ee Riyada Guud
**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** *malaha*
**War bixinta Shakhsiga:** "Doorashadani waxay ku saabsan tahay mustaqbalka Maine. Arimaha ugu waaweyn ee la xidhiidha horumarinta shaqaalaha, waxbarashada, daryeelka caafimaadka iyo isbedelka cimilada ayaan si haboon loo xalin. Waxaan u baahan nahay carruurta yar ee nidaamka daryeelka caruurta, daaweynta isticmaalka mukhaadaraadka, iyo helitaanka fursadaha waxbarashada."

**Khibradaha:** "Sideed sano oo ah Wakiil Gobol, Gudoomiye Guddiga Waxbarashada iyo Gudi Wadajir ah ee Xulashada Isticmaalida mukhaadaraadka. Shan sano oo Senatorka Gobolka, hogaamiyaha Aqoonyahanka Aqalka Guud, Gddoomiyaha Gudiga Adeegyada Caafimaadka Dadka, Duqa Magaalada Portland mudo afar sano ah, Macalin Jaamacadaha USM iyo UNE."

**Hadafyada:** "Haddii la idoorto, saddex ka mid ah hadafyadeyda waxay noqon doonaan in la balaariyo caymiska caafimaadka dhammaan muwaadiniinta, si buuxda loo maalgeliyo waxbarashada Kdg-12 iyo wax ka qabashada arimaha isbedelka cimilada. Dibuhabaynta cashuurta hantida ayaa sidoo kale ahmiyad wayn iigu leh."



Musharaxa Xisbiga Jamhuuriga

### Samuel P. Ledue


**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** *none*

***Musharaxu ma bixin macluumaad.***

# ★ Wakiilka Gobolka Maine

## ★ Musharaxiinta — Degmada 37

☑ Dhaqanka Codbixita



Musharaxa Xisbiga Jamhuuriga

### Jane E. Frey

**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** *malaha*

*Musharaxiista ka baxay kadib markii la daabacay waraaqaha.*



Musharaxa Xisbiga Dimuquraadiga

### Richard Farnsworth

**Shaqada Hada:** Ka hawl gabay Wakiilka Gobolka
**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** facebook.com/RichardFarnsworthforMaineHouse

**War bixinta Shakhsiga:** "Ka shaqaynta xeer-dejinta maahan mid kaliya oo fuliya shakhsi ahaaneed. Waa dadaal kooxeed sida nooca dimuqraadiyada. Anigu ma ihi oo kaliya mid rumaysan wax qabad saameynta kooxeed laakiin waxaan ku qanacsanahay in awooda dowladeena iyo qarankayagu ay ku tiirsan yihiin awoodeena inaan u shaqeyno sidii kooxdu ay u gaari lahayd ujeedooyin kooda."

**Khibradaha:** "Marka laga soo tago waayo-aragnimada xafiisyada, shaqadayda waxay ahayd qayb muhiim ah oo ku saabsan waxa aan siin karo codbixiyayaasha. Waayo khibradaasi waxay ahayd in ka badan 45 sano oo maareynta adeegyo bani'aadamnimo ah oo u adeega shaqsiyaadka qaba naafaada koritaanka iyo qoysaskooda."

**Hadafyada:**

- Ka shaqaynta dugsiyada hore K guud ee carruurta yaryar
- Hirgelinta nidaam wax ku ool ah oo loogu talagalay daaweynta dhibaatada isticmaalka maandooriyaha
- Bixinta adeegyada guryaha iyo taageerada dadka reer Maine ee hoylaa'aanta ah



Xisbiga Madaxa Banana Musharaxa

### Justin Benjamin Pollard

**Shaqada Hada:** Madaxweyne, Pollard Builders
**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** Pollard2018.com

**War bixinta Shakhsiga:** "Waxaan u ordayaa Wakiilka Gobalka sababta oo ah waxaan aad uga walaacsanahay kala qaybsanaanta qotada dheer ee bulshadeena u dhaxaysa aragtida kala duwan ee siyaasadeed. Dhexdhexaadiye furan oo awood u leh in uu fahmo oo xaliya fikrado kala duwan, waxaan rajeynayaa inaan ka shaqeeyo xalalka isu keenaya reer Maine."

**Khibradaha:** "Anigoo ah madaxweynaha shirkad dhisme, waxaan haystaa waayo-aragnimo u leh caqabadaha iyo fursadaha haysta milkiilayaasha ganacsiga yaryar. Waxaan bartay xalinta khilaafka waxaana la ii tababaray dhexdhexaadiye. Naxariisteyda iyo xushmada dadka iyo jacaylka dabiiciga ah ayaa igu dhiiri geliya inaan u shaqeeyo duni wanaagsan."

**Hadafyada:**

- Hagaajinta barnaamijyada tababarka shaqaalaha ee xirfadaha iyo dalabka shaqaalaha.
- Hagaajinta caafimaadka 'iyada oo loo soo marayo waxbarashada iyo ka shaqeynta caynsanaanta guud.
- Maine inay hogaamiso joogta ah ay noqoto iyada oo la ilaalinayo dhul dheeraad ah iyo horumarinta beeraha dabiiciga ah

# ★ Wakiilka Gobolka Maine

## ★ Musharaxiinta — Degmada 38

Kaliya Musharax



Musharaxa Xisbiga Dimuquraadiga

### Matthew Moonen

**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** *malaha*

***Musharaxu ma bixin macluumaad.***

## ★ Musharaxiinta — Degmada 39

Dhaqanka Codbixita



Musharaxa Xisbiga Dimuquraadiga

### Michael Sylvester

**Shaqada Hada:** Leh Ganacsi Yar
**Magaalada:** Jasiirada Peaks, Maine
**Website:** *malaha*

**War bixinta Shakhsiga:** "Waxaan ahaa xisbiga ka keliya ee Xisbiga iskaashiga dimuqraadiga ah oo loo doorto xafiiska wakiilka gobolka sanadkii 2016. Waxa aan ula jeedo Iskaashiga dimuqraadiyada waa inaadan weydiisan waxa dawladu kuu sameynayso sabab too ah waxaad ka hadli kartaa go'aamada halkii go'aamo la gaari lahaa albaabada ka xirin shacabka."

**Khibradaha:** "Anigu waxaan ahay wakiilka u fadhiya Degmada 39. Waxaan ka shaqeeyey Gudiga Farsamada, Ganacsiga, Cilmi-baarista iyo Horumarinta Dhaqaalaha 128-aad iyo waxaan ahaa madaxa Gudiga Horumarka."

**Hadafyada:**

- Ka dhig go'aan gaadhista mid loo wad adhan yahay, hufan lagana qayb qaadan karo
- Ka caawi sharci dajiyayaasha si ay uga fekeraan sida badan oo ka mid ah qabanqaabiyeyaasha ku saabsan arimaha cadaalada halkii ay sugi lahaayeen in la abaabulo.
- Gudbi sharciyada muhiimka ah eek u saabsan, degaanka silo caawiyo reer Maine cuntadooda, guryahooda, iyo inay helaan daryeelka caafimaadka iyada iyo qoysaskooda




Musharaxa Xisbiga Jamhuuriga

### Peter Doyle

**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** *malaha*

***Musharaxu ma bixin macluumaad.***

# ★ Wakiilka Gobolka Maine

## ★ Musharaxiinta — Degmada 40

Kaliya Musharax



Musharaxa Xisbiga Dimuquraadiga

### Rachel Talbot Ross

**Shaqada Hada:** Agaasimaha Dhalinyarada soo raacda Martin Luther King
**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** *malaha*
**War bixinta Shakhsiga:** "Waxaan jeclahay in aan ka mid noqdo kooxo isu keena dadka da'aadoodu ay kala duwan tahay, diinta, jinsiyada iyo qaababka noloshooda inay fursad u helaan si ay u gaaraan ujeedooyinkooda oo ay awood ugu yeeshaan inay doortaan noloshooda iyaga oo aan dhibaayo u geysanayn cid kale."

**Khibradaha:** *Musharaxu ma bixin macluumaad.*

**Hadafyada:**

- Ka caawinta dadka inay helaan daryeel caafimaad iyaga oo aan cabsi ka qabin inay lacag bixiyaan.
- Lacag loo helo dugsiyada si dad da 'walba ah ay u wax u bartaan oo ay u koraan.
- Samee isbedelo sidaas darteed dadka si aysan u gelin xabsiga.

## ★ Musharaxiinta — Degmada 41

Kaliya Musharax



Musharaxa Xisbiga Dimuquraadiga

### Erik Clark Jorgensen

**Shaqada Hada:** Xeer-ilaaliyaha, Shaqaalaha Asaasiga ah, La-taliye
**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** ErikJorgensen.org
**War bixinta Shakhsiga:** "Waxaan u ordayaa markii afaraad (iyo kama dambaysta) ee Aqalka Maine. Waxaan isku dayaa inaan ka jawaabo codsiyada dadka, waxaanan la dagaalamayaa inaan hubiyo in baahida gaarka ah ee Portland ay noqoto heerka gobolka, halka aan sidoo kale aan ka shaqeynayey siyaasado lagu ilaaliyo wanaaga Maine, tacliin iyo naxariis."

**Khibradaha:** "Ka hor doorashadayda waxaan 25 sanno ku qaatay maamulaha Maine ee qaybta waxbarashada aan faa'iido doonka ahayn. Augusta waxaan lix sano gudahood usoo shaqeeyay gudiga qoondaynta, kaas oo qoraya miisaaniyada Maine bilyan doolarka Maraykanka. Waxaan arkay oo aan wax badan ka ogaaday dhaqaalaha Maine, baahidiisa bulsho, ilo waxbarasho, daryeel caafimaad, bey'ad iyo dawlad."

**Hadafyada:** "Mudnaanta ayaa ah miisaaniyad cadaalad ah oo macquul ah oo aan dhib u geysaneynin Portland, ilaalinta deegaanka oo adag oo ay ku jiraan tamar nadiif ah, iyo sii wadida horumarinta dadweynaha Maine. Waxbarashada, laga bilaabo hore-K iyada oo loo marayo kulliyada beesha iyo nidaamka jaamacadda."

# ★ Wakiilka Gobolka Maine

## ★ Musharaxiinta — Degmada 42

☑ Dhaqanka Codbixita




Musharaxa Xisbiga Jamhuuriga

### Susan Abercrombie

**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** *malaha*

***Musharaxu ma bixin macluumaad.***



Musharaxa Xisbiga Dimuquraadiga

### Benjamin Collings

**Shaqada Hada:** La-taliyaha Siyaasada & Ganacsiga
**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** *malaha*

**War bixinta Shakhsiga:** "Mid weligii ahaa Dimuqraadi Shaqaalaha ah, waxaan rabaa in aan yareeyo saamaynta la tali yayaasha ganacsiga ay ku leeyihiin Xisbiga Dimuqraadiga iyo Hogaanka Xisbiga. Xadka xadidan ee Maine ayaa hoos u dhigay dheelitir la'aanta awooda laga haysto sharci-dejiyeyaasha iyo u ololayaasha iyo fuliyeyaasha. Dhamaan dadka reer Maine waxay u qalmaan xoriyad iyo ixtiraam. Augusta waxay u baahan tahay dib u habeyn cad."

**Khibradaha:** "Tan iyo markii aan aad u da 'yaraa, hooyadeyba waxay iisheegtay dhacdooyikii ERA iyo "kasoo horjeedka" Waxay gacan ka geysatay caawinaad haween u orday baarlamaanka markii aan ahaa toban jir. Waxaan ka shaqeyn jiray heer kasta oo ololeyaal ka socda golaha magaaladda ilaa madaxweyne, Maine iyo guud ahaan qaranka. U doodista qabiilka, muhaajiriinta, ururada shaqaale iyo kuwo badan oo la cadaadiyo."

**Hadafyada:**
- Dibudhiska canshuuraha, waxaa ka mid ah dib-u-dejinta siyaasada Gudoomiyaha laga bilaabo sanadkii ugu horeeyey ee xafiiska
- Khayraadyo badan oo loogu talogalay waxbarashada, ilmanimada hore ee dugsiga sare
- Dib-u-habaynta daryeelka caafimaadka oo ay ku jiri doonto daryeel maandooriyaha iyo maskax xanuun

## ★ Musharaxiinta — Degmada 43

Kaliya Musharax




Musharaxa Xisbiga Dimuquraadiga

### William Crockett

**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** *malaha*

***Musharaxu ma bixin macluumaad.***


# ★ Gudoomiyaha Degmada

Gudoomiyaha degmadu wuxuu ka masuul yahay inuu dejiyo miisaaniyada degmada iyo inuu shaqaalaysiiyo shaqaale qabta waajibaadka degmada. Degmada Cumberland waxay leedahay shan gudoomiye degmo. Gudoomiyayaasha degmooyinku waxay bixiyaan damaanado, waxay maamulaan beeraha degmada, degmada Cumberland, xarunta cross Insurance waxayna ka shaqeeyaan barnamijyada adeegyada bulshada, qashin uruurista, ilaalinta nadiifta biyaha iyo maaraynta xaaladaha deg dega.

**Mudada (sanadka doorashada soo socota):** 4 sano **Mushahaarka:** $10,771 sanadkii

## ★ Musharaxiinta — Degmada 3

Kaliya Musharax



Xisbiga Madaxa Banana Musharaxa

### Stephen Gorden

**Shaqada Hada:** Maamulaha DWSD, kaasoo u adeega 42% dadka ku nool Michigan; ka hawl gabay VP horumarinta shirkadaha ee AWK.
**Magaalada:** North Yarmouth, Maine
**Website:** *malaha*

**War bixinta Shakhsiga:** "Steve ururkiisa ayaa si qarsoodi ah kula taliyey dad lasoo xulay oo ka tirsan gudiga biyaha iyo adeegyada biyaha loo isticmaalo arimo ku saabsan qaab dhismeedka, in la bilaabo suuqa furan oo ku dhex jira qaybta dadweynaha."

**Khibradaha:** "Steve wuxuu la shaqeeyey ururo badan oo qaranka ah wuxuuna madax ka ahaa Ururka Shaqaalaha Biyaha Ameerika, urur ka kooban 57,000 xubnood; gudoomiyaha golaha adeega biyaha; mas'uul ka ah sharciyada biyaha qaranka, horayna usoo saaray sadexlaab milyan ee arimaha dhismaha kaabashada."
**Hadafyada:** "Si kor loogu qaado dawlad u adeegta codbixiyayaasha sida (1) kordhinta tayada nolosha iyada oo loo soo marayo masuuliyad, daahfurnaan iyo kalsooni; (2) in la helo shaqaale wanaagsan; (3) horumar joogta ah oo la socda go'aamada cusub iyo xog ururinta. Tusaale: Taageerida helitaanka habka internetka muwaadiniinta"

## ★ Musharaxiinta — Degmada 4

Dhaqanka Codbixita



Musharaxa Xisbiga Dimuquraadiga

### Thomas Coward

**Shaqada Hada:** Qareen, Guryo iyo hanti iibiye, Bare
**Magaalada:** South Portland, Maine
**Website:** *malaha*

**War bixinta Shakhsiga:** "Waxa aan ka helay wanaag bulshada aan la deganahay, waxaan hubaa inaan samayn karo wixii dhinacayga si aan u hagaajiyo bulshadayda intii aan awoodo. Ka qayb qaadashada dowlada hoose waa ka ugu fiican uguna adag ee aan gacan ka geysan karo."

**Khibradaha:** "Hadii aan ahay qareen xaxaan ka caawiyey dadka sidii ay u xalin lahaayeen dhibaatooyinka ilaa 37 sano. Golaha magaalada iyo duqa magaalada, waxaan u dooday si loo helo barnaamijyo ku saabsan horumarinta bulshada. Waxaan ahaa gudoomiye mudo 6 sano ah. Waxaan ka wakil ahaa degmada Cumberland ee gudiga degamada gobolka Maine halkaas oo hada aan ka ahay madaxweyne."

**Hadafyada:**

- Xasilinta maalgelinta gobolka ee xabsiga degmada si loo hagaajiyo xaaladaha iyo in lagu caawiyo hoos u dhigida canshuuraha hantida.
- Balaarinta taageerada degmada ee fursadaha madadaalada kana baxsan Xarunta Bulshada
- Inay helaan qaabka khadka Internet-ka qaybaha degmaooyinka ee aan lahayn



Xisbiga Madaxa Banana Musharaxa

### William Holmes

**Shaqada Hada:** Agaasimaha isgaarsiinta deg dega ah
**Magaalada:** Westbrook, Maine
**Website:** *malaha*
**War bixinta Shakhsiga:** "Waxaan ku hogoomiyaa tusaala. Waxaan u diyaar ahay inaan caawimo fidiyo markii loo baahdo waxaana hogaamiyaa marka loo baahdo. Waxaan ahay mid hal abuur leh oo macquul ah lehna xiriirka shaqaalaha iyo horumarinta siyaasada. Ilaahay baan aamin sanahay. Sharaf qiimo leh, Waxaan ahay mid haysta dhaqanka iyo qiimaha waxaan kaloo ahay mid dhexdhexaad ah. Weligay waxaan taageerayey doorashada qofka."

**Khibradaha:** "Xirfadaydu waa mid 37 sano ah oo aan ahaa hogaamiye badbaadiya bulshada. Kow iyo labaatan sano ayaan ka tirsanaa xafiiska askarta sherifka iyo 16 sano hogaamiyaha degamada 9-1-1. Waxaan leeyahay xirfado badan sida: Xiriirka shaqaalaha, Horumarinta Booliiska, Gorgortanka xooga shaqaalaha, Iskaashiga jaaliyada gobolka."

**Hadafyada:**

- U adeegid daacad ah
- In la horumariyo iskaashiyada jaaliyadaha gobolka
- Inaad noqoto wakiil wanaagsan dhinaca canshuur bixiyayaasha

# ★ Gudoomiyaha Degmada

## ★ Musharaxiinta — Degmada 5

Kaliya Musharax



**Musharaxa Xisbiga Dimuquraadiga**

### James Cloutier

**Shaqada Hada:** Qareen
**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** *malaha*

**War bixinta Shakhsiga:** "Waxaan rumay sanahay erayadu inay qabtaan hadafyada aan u leeyahay dimuqraadiyadeena, ay ku jirto dawlad goboleedku, "Dowladeenu waxay u taagan tahay inay hubiso in kuwa daciifka ah ay yihiin kuwo amaan ah, xooguna uu yahay xaq. Dawlada degmada Cumberland waxay leedahay inay noqoto mid u leh awood inay u adeegto si wanaagsan dadweynaha qiimo hoose."

**Khibradaha:** "39 sano qareen magaalada Portland. 10 sano Gudoomiyaha Degmada. 10 Sano Xildhibaanka Magaalada Portland, Duqa magaalada hore. 6 sano xubinta gudiga hay'ada jidadka, gudoomiye ku xigeen iyo gudiyo kale oo badan."

**Hadafyada:**
- Hagaajinta adeegyada gobolka ee muwaadiniinta
- In la bilaabo hagaajinta fursadaha waxbarashada
- Kordhin "iibsashada" ganacsiga iyo beeraha gobolka

# ★ Xeer ilaaliyaha Degmada

Xeer ilaaliyaha degmadu waa xeer ilaaliyaha guud ee degmada. Xeer ilaaliyaha degmadu wuxuu hogaamiyaa shaqaale lagu magacaabo kaaliyayaasha xeer ilaaliyaha degmada. Qareenka degmadu wuxuu baaraa dembiyada degmada marka laga reebo dilka, kaasoo uu qaabilsan yahay xeer ilaaliyaha gobolka. Waxay go'aan ka gaaraan hadii dembiile la garsoorayo. Xeer ilaaliyayaasha degmadu waxay bixiyaan heshiisyo waxay na fuliyaan baaritaanada garsoorka.

**Mudada (sanadka doorashada soo socota):** 4 sano **Mushahaarka:** $164,088 sanadkii

## ★ Musharaxiinta — Degmada 5

☑ **Dhaqanka Codbixita**



Musharaxa Xisbiga Jamhuuriga

### Randall Bates

**Magaalada:** Yarmouth, Maine
**Website:** *malaha*

*Musharaxiista ka baxay kadib markii la daabacay waraaqaha.*



Musharaxa Xisbiga Dimuquraadiga

### Jon Gale

**Shaqada Hada:** Xeer Ilaaliyaha Difaaca Dambiyada, Xeer Ilaaliyihii hore
**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** JonGaleForDA.com

**War bixinta Shakhsiga:** "Hogaamintu waxay noqotaa mid wax ku ool ah marka lagu maamulo cadaalad, adigoo tusaale u noqonaya dadka kale inay sidaas oo kale ay sameeyaan. 23+ sano garyaqaan, sida qareenka degmada, waxaan u dagaalami doonaa wixii sharci ah. Sharcigu waa inuu ka idha xiran yahay jinsiyada, doorashada jinsida, xaalada dhaqaale, iyo kartida jirka ama maskaxda."

**Khibradaha:** "Waxaan ka shaqeeyey kiisas aan waaweynayn ilaa qaar dil ah, labada dhinacba, xeer ilaaliyaha iyo qareenka difaaca. Waxaan metalay dad kasoo jeeda dhinackasta oo xaga dhaqalaha ah. Waxaan lasoo shaqeeyey dad lasoo dhibaateeyey, labada dhinacba sida xeer ilaaliyaha ama lataliye gaar ah. Shaqadayda badan keeda ayaa ku sugnaa degmada Cumberland, laga bilaabo 1994."

**Hadafyada:**

- Kor u qaadista nabad gelyda bulshada, xoog saarida waxa sababa dabeecadaha dambiyada: xadgudubka mukhaadaraadka, caafimaadka maskaxda, saboolnimada dheer
- Dib u habaynta damiinashada; wax ka qabashada sinaan la'aanta dembiyada dadka laga tirada badan yahay/xabsi gelin tooda
- Hagaajinta barnaamijyada cadaalada iyo dib u habeynta si loo yareeyo falal dambiyeedyada soo noqnoqda



Xisbiga Madaxa Banana Musharaxa

### Jonathan Sahrbeck

**Shaqada Hada:** Ku xigeenka qareenka degmada Cumberland
**Magaalada:** Cape Elizabeth, Maine
**Website:** VoteSahrbeck.com

**War bixinta Shakhsiga:** "Hadaan ahay xeer ilaaliye, waa shaqadayda inaan kala saaro dadka kuwa khalad mar sameeyey iyo kuwa khatarta ah ee lasoo qabtay. Hadii aan noqdo Qareenka degmada, Waxaan ku dadaalayaa cadaalada aniga oo ixtiraameya in aan wax ka qabano khatarta amniga bulshada ee ugu weyn – ku xad gudubka mukhaadaraadka, iyo ganacsiga galmada."

**Khibradaha:** "Waxaan mustaqbalkeyga u huray inaan ilaaliyo amniga dadweynaha. Waxaan leeyahay khibrad dheeri ah oo ka badan kuwa iga soo horjeeda iyo khibrad khaas ah oo ah qabashada dambiyada ku lug leh mukhaadaraadka, dhibaatooyinka guriga, dhalinyarada, iyo ka ganacsiga galmada. Stephanie Anderson, oo ah qareenka degmada hada, ayaa isiisay taageero inaan ahay musharax uqalma xilka xafiiskan."

**Hadafyada:**

- Kordhinta wacyiga iyo kahortaga dagaalka aan kaga soo hor jeedno dhibaatooyinka mukhaadaraadka
- In laga ilaaliyo dadweynaha dembiileyaasha iyada oo loo raacayo ciladaha damaanad
- Kordhinta wacyigelinta si loola dagaalamo ka ganacsiga galmada, xadgudubka waayeelka iyo xadgudubka caruurta

# ★ Garsooraha Maxkamada


Garsooruhu wuxuu leeyahay awood xukun oo siinaysa kalsooni hantida, korsashada iyo magac bedelista, ilaalinta, iyo dacwadaha difaaca. Maxkamadani waxay xalisaa kiisaska xeerbeegayaal la'aan.

**Mudada (sanadka doorashada soo socota):** 4 sano

**Mushahaarka:** $67,049 sanadkii

## ★ Musharaxiinta

Kaliya Musharax



Musharaxa Xisbiga Dimuquraadiga

### Paul Aranson

**Shaqada Hada:** Qareen, Muusik
**Magaalada:** Scarborough, Maine
**Website:** facebook.com/Aranson4ProbateJudge
**War bixinta Shakhsiga:** "Garsooraha maxkamadu wuxuu dhegaystaa kiissaska ku saabsan mas'uul qaadista, caruurta iyo dadka waaweyn, xeer ilaalinta, korsashada, magic bedelista iyo dhaxalka. Waa muhiim inaad noqoto mid xaqsoor ah markaad kiisaska diidid, fahamsan dhaqanka aadanaha, yaqaana sharciga iyo shuruudaha maxkamada, sameeyana ficil deg deg ah. Booskan waxaan adeegsan doonaa arimahan oodhan."

**Khibradaha:** *Musharaxu ma bixin macluumaad.*

**Hadafyada:**

- Inaan noqdo mid dhegaysiga ku fiican
- Umuujiya xushmad muwaadiniinta
- Marwalba xusuusnaada cida uu u shaqaynayo

# ★ Askariga Sheriff


Degmada Cumberland boliskoodu wuxuu ilaaliyaa fulinta sharciga dhamaan degmooyinka Cumberland oo lahayn bolis u khaas ah degmadaas. Sherifku wuxuu mas'uul kayahay xabsiga degmada Cumberland iyo maxaabiista.

**Mudada (sanadka doorashada soo socota):** 4 sano

**Mushahaarka:** $97,939 sanadkii

## ★ Musharaxiinta

Kaliya Musharax



Musharaxa Xisbiga Dimuquraadiga

### Kevin Joyce

**Shaqada Hada:** Sheriff of Cumberland County
**Magaalada:** Standish, Maine
**Website:** *malaha*

**War bixinta Shakhsiga:** "Shaqada askariga sheriffku waa inuu u shaqeeyo kuli dadka oo dhan, hubinya fulinta sharciyada gobolka, laakiin iyadoo aan la faragelinayn xuquuqda dastuurka qofka. Waxaa kaloo muhiim ah, inaan u sticmaalno xabsiga sidii loogu talagalay oo ay noqon bakhaar lagu aruuriyo dadka xanuun maskaxeedka qaba/ daroogada qaata iyo kuwa guri la'aanta ah."

**Khibradaha:** "Hada, Askarigii 50naad ee degmada Cumberland. Waxaan rabaa inaan helo markii sadexaad aa doorashada askarinimadan waxaana ku qaatay xirfadayda xafiiska askariga. Waxaan kasoo qalin jebiyey jaamacada FBI National Academy, waxaan haystaa shahaadada masters oo ah maamulka ganacsiga waxaa fariistaa shirarka gudiyada xirfadaha waxaana ka mid ahay ururada dad weynaha."

**Hadafyada:**

- Xalinta isticmaalka mukhaadaraadka: Horuwadista ka shaqaynta dhibaatooyinka daroogooyinka
- Dib u hagaajinta xabsiga: Hubinta inaan xirno kuwa khatarta u ah dadweynaha iyo kuwa khatarta ku ah duulimaadka
- Xanuunka Maskaxda: In mudnaan la siiyo baahida adeegyadan.

# ★ Golaha Magaalada Portland

Golaha Deegaanka wuxuu dejiyaa xeerarka, qawaaniinta, iyo talooyinka la xidhiidha dhamaan arimaha magaalada iyo dawlada, oo ay ka mid yihiin boliiska, caafimaadka dadweynaha, shaqada dadweynaha sida biyaha iyo bulaacadaha, iyo kuwo badan. Waxaa jira shan golo degmeed Portland iyo sadex qaabilsan magaalada oodhan. Goluhu wuxuu hirgeliyaa miisaaniyada sanadka oo loogu talagalay hawlaha degmada iyo iskuulada, waxayna bixisaa xisaabin sanadkasta. Goluhu wuxuu magacaabaa maamulaha magaalada, lataliyaha sharciyada, iyo karaaniga magaalada.

**Mudada (sanadka doorashada soo socota):** 3 sano **Mushahaarka:** $5,600 sanadkii

## ★ Musharaxiinta — Degmada 1

☑ Dhaqanka Codbixita



### Matthew Coffey

**Shaqada Hada:** Iskiis u shaqaysa Dhismaha
**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** *malaha*

**War bixinta Shakhsiga:** "Ilaa intii noloshayda qaangaadhka aan ahaa waxaan si macquul leh aan uga shaqeeyay wanaaga beesheena. Waxaan ka soo shaqeeyey mashaariicda sida: mudaharaadyo lagaga soo horjeedo dagaalada aan loo baahnayn iyo/ caawinaada cunto siinta dadka aan guryaha haysan iyo dadka saboolka ah; aniga oo isku dayaya in aan cod siiyo dadka isu hadli karayncod."

**Khibradaha:** "Waxaan hada ka hor u cararay golaha magaalada. Qofna kama aan maqlin in loo diyaar garoobayi karo xafiiska ugu horeeya ee loo doorto. Waxaan soo bandhigi doonaa balanqaad ah in Portland ay ka dhigto meel wanaagsan oo ay ku noolaan karaan muwaadiniinta caadiga ah iyo meel fiican oo ganacsiyadu ay hore ugu maraan."

**Hadafyada:**
- Si loogu dhiirigeliyo ganacsiga gaarka ah inay maal galiyaan dadka reer Portland
- In la yareeyo tirada dadka gurya la'aanta ah iyo kuwa saboolka ah ee bulshada
- In loo dhameeyo si cadaalad ah, laakiin aan loo baahnayn fara gelinta dawlada waxay kordhineysaa xoriyadeenna madaniga ah.



### Belinda Ray

**Shaqada Hada:** Maareeyaha Xisaabaadka/Xildhibaanka Magaalada
**Magaalada:** East Bayside neighborhood of Portland, Maine
**Website:** BelindaRay.me

**War bixinta Shakhsiga:** "Wada hadalku waa dimuquraadiyada. Dhamaan mawduucyada, si kasta ha u adkaatee, waa in laga wada hadlo si macquul ah, daacad ah, iyo xushmad fikradaha kala duwan. Waxaan si adag u baadigoobaa arimaha iyo ka shaqeynta si aan u gaaro go'aamo tixgeliya dadka kala duwan, jinsiyada, dhaqamada, aqoonsiyada jinsiyadaha iyo aragtida siyaasadeed."

**Khibradaha:** "Waxaan ku noolaa Portland mudo 20 sano ah, waxaan ku korsday laba caruur ah halkan, waxaan bilowday urur xaafadeed, waxaanay sadex sano ka shaqeysay Golaha Magaalada. Waxaan ka mid ahay gudiga METRO, Maktabadda Dadweynaha Portland, iyo Golaha dawlada Portland, waxaan gacan ka gaystay sidii aan u maamuli lahaa laba ganacsi oo yaryar oo Portland ah."

**Hadafyada:**
- Dhisida isbahaysi si wax looga qabto guryaha la awoodi karo, hoy la'aanta, iyo khalkhalka isticmaalka maandooriyaha
- Kordhinta fursadaha gaadiidka dadweynaha iyo fursadaha dhisida
- Hore u sii wadida xoojinta ra'yiga bulshada ee ku saabsan arimaha isku dhafan

# ★ Golaha Magaalada Portland

## ★ Musharaxiinta — Degmada 2

Dhaqanka Codbixita



### Spencer Thibodeau

**Shaqada Hada:** Qareen Verrill Dana
**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** SpencerForCouncil.com
**War bixinta Shakhsiga:** "Yaraan taydii Portland waxaan ku dhibtooday dhinaca tacliinta, marwalba waxaan u baahday inay dadka kale la shaqeeyo si aan hoe u maro - qiimaha aan u keenay Golaha. Waxaan ku dadaalayaa in aan noqdo mid aad u shaqeeya. Sidoo kale waa inaan helno oo mar walba ku dadaalo in aan ku soo jawaabo 24 saac gudahood."

**Khibradaha:** "Markaan dhameystay mudnaanta kowaad ee Golaha (Guddiga Wadajirka iyo Gaadiidka Gaadiidka), waxaan u keenay natiijooyin Degmada 2aad - oo ay ka mid tahay markii ugu horeysay ee baaskiilada loo sameeyey jid ay maraan oo aamin ah Portlaned, maaliyad badan oo loogu talagalay kabayaasha dadka, Kulamada goluha waxaa loo soo daaya warbaahinta bulshada, Xafiiska Fursadaha Dhaqaale, iyo hubinta maalgelinta dugsiyadeena."

**Hadafyada:**

- Balaadhinta helitaanka noocyo kale oo dhaqdhaqaaqa ah (jidka baaskiilada, lugaynta)
- Taageerada dadaalka ah si Portland looga dhigo mid la awoodi karo, gaar ahaan guryaha
- La shaqaynta Guddiga Iskuulka si wax looga qabto caqabadaha maaliyadeed ee dugsiyada



### Jon Torsch

**Shaqada Hada:** Macluumaadka Nidaamka Awoodda Qalabka xog ururinta
**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** JonTorschForPortland.me
**War bixinta Shakhsiga:** "Waxaan ahay Dimuquraadiga hanti wadaaga bulshada, taas oo macnaheedu yahay in aan aaminsanahay in aan sii wado dimuqraadiyada Maraykanka guud ahaan dhaqaalaha, iyo goobaha shaqada gaar ahaan. Marka bulshada shaqaalahu ay xakameynayaan sida shaqadeena loo isticmaalo, waxaanu si wax ku ool ah uga qayb qaadan karnaa ka faa'iidaysiga barwaaqada magaaladeena."

**Khibradaha:** "Xafiiskani waa inuu noqdaa mid u adeega dadweynaha, ma aha waddo xirfadeed. Waxaan ku soo koray aqal lawada shaqeeyo waxaanan ka qayb galay dugsiyada dadweynaha Maine ilaa iyo intaan kabaxay kuuliyada injirneer nimada. Waxbarashada dadwaynaha ayaa ku filan qof walba uu u helo kursiga Golaha Magaalada Portland. Hadii aad diidan tahay, i doorta, waanwada hagaajin doonaa inagoo isku duuban."

**Hadafyada:**
Dhisidda awoodda shaqaalaha iyada oo loo marayo isbaheysiga shaqooyinka, iskaashatada shaqaalaha, mushahaar wanaagsan, iyo faa'iidooyinka. Kalsoonaanta cadaalada guryaha, ilaalinta kireystayaasha iyo horukaca canshuurta guryaha. Dib u habeyn ku samaysan wadashaqeynta dadweynaha: dugsiyada dadweynaha, gaadiidka dadweynaha, xogta furan, iyo doorashooyin nadiif ah.

## ★ Musharaxiinta — oo Dhan

Dhaqanka Codbixita



### Joey Brunelle

**Shaqada Hada:** Mid isu shaqeeya – samaynta website iyo qaabaynta
**Magaalada:** Kennebunk, Maine
**Website:** BrunelleForPortland.org
**War bixinta Shakhsiga:** "Waxaan aaminsanahay in dadka Portland oo idil ay helaan dugsiyo wanaagsan, shaqooyin fiican iyo guryo la awoodi karo. Waxaan aaminsanahay in aan la dagaalano isbedelka cimilada. Waxaan aaminsanahay in aan soo dhaweyneyno dhamaan muhaajiriinta. Waxaan aaminsanahay in xukuumadu noqoto mid hufan oo la heli karo. Kaliya ee aan wada shaqeyn ayaan sameyn karnaa sidan."

**Khibradaha:** "Waxaan u dagaalamay in la helo guryo la awoodi karo, talaabo ku saabsan isbedelka cimilada, iyo dugsiyo wanaagsan sanado badan. Waan aqaan habka dadka la isugu keeno. Waxaan ahaa mulkiile ganacsi, mulkiile guri, kirayste, iyo canshuur bixiye Portland. Waxaan ka soo jeedaa qoysas ay ka yimid yihiin Quebec iyo Lubnaan."

**Hadafyada:**

- In la dhiso guryo dadweyne oo badan, oo la awoodi karo dadka shaqaalaha Portland iyo qoysaska
- Hubi in dugsiyadayada iyo macallimiintu ay helaan lacag iyo taageerada ay u baahan yihiin
- Hagaajinta gaadiidka basaska, fidinta jidadka baaskiilada, iyo yaraynta taraafikada baabuurta



### Nick Mavodones

**Shaqada Hada:** Maamulaha Hawlaha Casco Bay Lines
**Magaalada:** Yarmouth, Maine
**Website:** NickForCouncil.com
**War bixinta Shakhsiga:** "Waxaan horey uga soo shaqeeyey kabtanka doonta oo waxaan u adeegay wakiilka gorgortanka. Waxaan ka soo shaqeeyey golaha magaalada tan iyo 1997, oo ay ku jiraan afar jeer oo aan noqday Duqa Magaalada, waxaan dareemayaa waajibaad hada ka badan si aan u sii wado adeega dadweynaha oo aan u fidiyo hogaamin isku dheelitiran, iskaashi, iyo hogaaminta bulshada."

**Khibradaha:** "Anigu horey u ahaa gudoomiyaga gudiga Iskuulka Portland, waxaan si firfircoon uga qaybqaatay ururada PTO ee dugsiyada caruurteyda, waxaan soo dhamaystay waqtigii todobaad ee Golaha Magaalada. Waxaan ka qalinjabiyey Machadka Hogaaminta Madaniga ah waxaanan hada gudoomiye ka ahay Gudiga Maaliyadda ee Golaha iyo Guddiga Dhismaha Dugsiyada."

**Hadafyada:**

- Sii wadida hogaaminta xasilinta maaliyada iyo gargaarka canshuurta
- Sii wadida taageerida dadaalka kor loogu qaadayo guryaha la awoodi karo ee Portland
- Sii wadida hogaaminta taageerada banaamijyada tamarta nadiifka ah

# ★ Gudiga Dugsiyada Portland

Gudiga dugsiyada Portland ee waxbarashadu waxay mas'uul ka yihiin sidii ay u bixin lahaayeen mashruucyada waxbarashada kuli ardada dhigata dugsiyada magaalada Portland. Gudigu wuxuu ka kooban yahay sagaal xubnood. Waxay dejisaa xeerarka barnaamijyada tooska ah ee nidaamka 18ka dugsi ee Portland. Gudigu waxay shaqalaysiiyaan maamulaha dugsiyayda kaasoo maamula hirgeliyana barnaamijyada iyo xerarka dugsiyada.

**Mudada (sanadka doorashada soo socota):** 3 sano

**Mushahaarka:** $8,324.06 gudoomoyaha gudiga, xubnaha kale $6,450.24

## ★ Musharaxiinta — Degmada 1

**Kaliya Musharax**



### Abusana Michael Bondo

**Shaqada Hada:** Shaqaale isu shaqeeya, Abaabulay ururka In Her Presence
**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** facebook.com/micky.portlandschoolboard
**War bixinta Shakhsiga:** "Hogaankeyga shakhsi ahaaneed waa karti aan u leeyahay inaan fuliyo hawsha si wax ku ool ah, kalsooni, go'aamis leh, la qabsoomi karo iyo La qabsasho. Waxaan rumaysanahay in shakhsigu yahay mid gaar ah, habka ugu wanaagsan ee wax loo baro ardaydeena waxay tahay in loo soo bandhigaan fursado ay ku heli karaan degmada oo qiime u yeeshaan dadka."

**Khibradaha:** "5 tayda caruur waxay soo wada dhigteen Dugsiyada Guud ee Portland. Sidoo kale waxaan ahay Hogaamiye Waalidiinta caruurtoodu dhigtaan dugsiyada Portland, barnaamijkan wuxuu ku saleysan yahay Dugsiga Muskie ee Adeega Dadweynaha. Waxaan abuuri karnaa fursado ka qaybgalka dugsiyada iyo qoysaska."

**Hadafyada:**

- Balaarinta barnaamijyada hore loo yaqaan Pre-K dhamaan carruurta
- Kordhinta Kala duwanaanshaha ee baridda shaqaalaha iyo maamulka si ay u muujiyaan ardaydeena
- Taageer iskaashiga u dhexeeya dugsiyadeena iyo ganacsatada magaalada oo dhan

# ★ Gudiga Dugsiyada Portland

## ★ Musharaxiinta — Degmada 2

Dhaqanka Codbixita



### Emily Figdor

**Shaqada Hada:** Agaasimaha Ololaha MoveOn
**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** EmilyForSchoolBoard.com
**War bixinta Shakhsiga:** "Waxaan aaminsanahay si fiican awooda waxbarashada dadweynaha si loogu bedelo nolosha caruurta. Taasi waa siday u ahayd qoyskeyga, waana in ay u noqoto sidaas oo kale dhamaan carruurta iyo qoysaska. Waxaan si xoogan ugu doodaa jaaliyadaha si ay u bartaan hababka siyaasadeed silo gaaro isbedel carruurta."

**Khibradaha:** "Waxaan haystaa 20 sano oo xirfad ah siyaasada dadweynaha iyo qabanqaabinta si looga dhigo aduunka meel wanaagsan. Waxaan hogaaminayay ololihii guuleystay si aan u cusbooneysiiyo afarta dugsiyada hoose ee Portland, ka dib 23 sano oo dib u dhac ku yimid magaalada. Gabdhahaygu waxay dhigtaan Reiche iyo King, anigana waxaan la wadaagaa madaxa Reiche PTO."

**Hadafyada:**
- Gudbi si guud u helitaanka dugsiga hore-K.
- Hubi miisaaniyada loo baahan yahay si loo daboolo qorshaha shanta sano ee degmada si loo hagaajiyo guusha iyo sinaanta.
- Rumee in magaalada ay dayactirto dhamaan afarta dugsiyada hoose, oo ay ku jiraan Reiche.



### Jeanne Swanton

**Shaqada Hada:** Maareynta Mashruuca iyo Adeegyada Diiwaangelinta ee dhowr shirkadood oo maxali ah
**Magaalada:** West End neighborhood of Portland, Maine
**Website:** SwantonForSchoolBoard.org
**War bixinta Shakhsiga:** "Waan jeclahay Portland, waana ku hanwey nahay dugsiyadeena dadweynaha. Waxaan aaminsanahay in ardayda la siiyo qalabka loo baahan yahay si ay ugu dadaalaan tacliinta, iyo inay noqdaan xubin ka mid ah masuuliyadaha iyo xubnaha bulshada. Waxaan aaminsanahay in loo shaqeeyo joogto, la socod, iskaashi iyo muhiimada beesha. Aynu gacmaheena isu geyno, is dhageysano oo wada shaqayno."

**Khibradaha:** "Toban sano oo mutadawic nimo ah, oo ay ka mid yihiin hogaanka Reiche ee PTO, xubin gudiga WENA, iyo aasaasaha ah Ilaalinta Dugsiyadeena Deriska ah. Waxaan xiriiryo xoogan la yeeshay gudiga dugsiga, golaha magaalada iyo hogaamiyeyaasha bulshada. Waxaan Isku duway 20 sano oo khibrad dhaqaale ah, waxaan haystaa xirfadahan, waayo-aragnimo iyo dabeecad si aan isbedel u sameeyo."

**Hadafyada:**
- Miisaaniyad sanadeed, wada shaqeyn, iyo sinaanta waxbarashada
- Wax ka qabashada dhibaatada maaliyadeed ee sii kordheysa oo ka timaada maalgelinta gobolka
- Kordhinta wadashaqaynta iyo isgaarsiinta dhamaan dhinac kasta
- In la hubiyo dariiqa ardayga kasta si uu u gaaro guusha waxbarashada

## ★ Musharaxiinta — oo Dhan

Kaliya Musharax



### Sarah Thompson

**Shaqada Hada:** Maamulaha Nidaamka Meelaynta Ardayda Kalkaalisooyinka
**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** *malaha*
**War bixinta Shakhsiga:** "Waxaan u doodaa Dugsiyada Dadwaynaha oo waxaana wax kusoo bartay Dugsiyada Guud ee Portland. Waxaan aaminsanahay in waxbarashada dadwaynahu ay ku xirantahay guusha bulshada. Waxbarashada dadweynaha waxay u dabaaldegtaa oo ay qaadataa dhamaan ardayda iyo shakhsdooda si ay gaaraan kartidooda buuxda."

**Khibradaha:** "Waxaan soo dhigtay Dugsiyadda Guud ee Portland anoo leh laba carruur ah oo sidoo kale ka qalinjabiyey PPS. Waxaan kasoo shaqeeyey Guddiga Waxbarashada Dadweynaha ee Portland 12kii sano ee la soo dhaafay. Waayo khibradayda iyo anshaxa shaqada ee xoogan ayaan ku sii wadi doona si joogta ah iyo deganaanshaha."

**Hadafyada:**
- Isku haynta ilaha dhaqaale si loo gaaro iujeedooyinka degmada
- Sii wadka la shaqaynta bulshada si loo hagaajiyo guusha ardayga
- Khayraadka tooska ah si looga caawiyo ardayda inay dareemaan aqbalaad, amaanka iyo jecel

# ★ Biyaha Degaanka Portland

Biyaha Degaanka Portland waxay u fidisaa adeega biyaha dadweynaha ilaa 200,000 oo qof ee magaalad Portland, South Portland iyo Westbrook, iyo degmooyinka Cape Elizabeth, Cumberland, Falmouth, Gorham, Raymond, Scarbrough, Windham iyo Standish. Gudiga hanti dhawrka ayaa maamula Biyaha Degaanka Portland. Sida golaha magaalada oo kale, xubnuhu waxay aqbalaan miisaaniyada, ansixiyaan qiimaha iyo qiyaasaha adeegyada guud; waxay dejiyaan qorshooyin iyo waxay magacaabaan gudoomiya guud si uu u maamulo arimaha ururka. Waxaa jira 11 xubnood oo la soo doortay ooh anti dhawrka ah, afar ka mid ah waxaa laga soo doortaa magaalada Portland.

**Mudada (sanadka doorashada soo socota):** 5 sano

**Mushahaarka:** $100 shir kasta, kama badnaan karo $2,400 sanadkii

## ★ Musharaxiinta

☑ Dhaqanka Codbixita



### Wayne Olson

**Shaqada Hada:** Maamulaha, Xalalka Dhaqaalaha. Dhaqaale-yaqaan Takhasus leh

**Magaalada:** Portland, Maine

**Website:** http://solutionseconomics.com/expertise/wayne_olson

**War bixinta Shakhsiga:** "Khibrada shaqadeyda waa mid sameeysa kormeerka adeegyda dadweynaha, taas oo si fiican iigu adeegi lahayd hadii aan noqdo wakiilka. Waxaan rajeynayaa inaan tuso asalkayga iyo tababarkayga si aan u barto arimaha iyo caqabadaha hortaagan PWD ka dibna ka caawiyo sameynta xalal waxtar u leh macaamiisha PWD."

**Khibradaha:** "Dhaqaale-yaqaan arimaha khuseeya korontada, gaaska, isgaarsiinta, iyo warshadaha biyaha.
Shahaadada M.A. ee dhaqaalaha, Falanqaynta Maaliyadeed ee Sharci ahaan, ayaa ku gudbay imtixaanada siduu u noqdo xisaabiyaha guud.
Qoray xeerka A ilaa Z ee Nidaamka Adeegga Bulshada"

**Hadafyada:** "Ma garanayo dhibaatooyin waaweyn adeegga PWD ee macaamiisheeda. PWD waa inay bixisaa adeeg la isku haleyn karo iyo qiimo macquul ah ee macaamiisha lana isticmaalayo dhaqanka ugu wanaagsan iyadoo la adeegsanayo habab furan oo hufan."



### Kimberly Rich

**Shaqada Hada:** Wakiilka Biyaha Degaanka Portland

**Magaalada:** Portland, Maine

**Website:** KimRichPortland.com

**War bixinta Shakhsiga:** "Waxaan maareeye ka ahaa hay'adaha aan lacag doonka aheyn muddo 35 sano ah iyo hada adeegyada dadweynaha, waxaan ku dadaalayaa inaan noqdo hogaamiye wadajir ah oo leh hadafyo cad cad. Waxaan qiimeeynayaa isgaadhsiin wanaagsan, adeegyo wax ku ool ah, iyo dhegeysi firfircoon. Anigu waxaan ahay qof aan laga dabooli karin iskahorimaadka laakinse waxaan doorbidaa dareenka bulshada."

**Khibradaha:** "Wakiilka Hada PWD. Waxaan u dooday hogaansamida Portland ee xeer ilaalinta deegaanka (DEP) ee qawaaniinta qashin qubka jidka Ocean. Aasaasid xubin guddiga, Blandings beerta xawayaanka duurjoogta, Biddeford, ME. Xubinta Guddiga La-talinta ee harada White Bear, MN. Taageere, South Potland isutaga Clear Skies oo saameeynaya dhuumaha saliida ee gaboobay oo ku dhow Sebago Lake."

**Hadafyada:**
- Horumarinta rikoorka weyn ee Maamulka Biyaha Degaanka iyo maaraynta adeegyada dadweynaha tan iyo 1907
- Ilaalinta biyaheena nadiifta ah ee harada Sebago
- Taageerida shaqaalaha degmada ee ugu adeega qiyaastii 200,000 oo macaamiisheena ah

# ★ Golaha Magaalada Jasiirada Peaks

Golaha Jasiirada Peaks waxay u adeegaan lataliyayaal, ururinta talooyinka dadka degan Jasiirada Peaks iyo saamaynta talooyin ku saabsan Golaha Magaalada Portland arimaha la xiriira Jasiirada. Waxaa jira todobo xubnood oo ka tirsan Golaha Jasiirada Peaks. Waxaa loo doortaa mudo sedex sano ah, iyadoo leh laba ama sedex kursi oo doorasho ah sanad kasta.

**Mudada (sanadka doorashada soo socota):** 3 sano **Mushahaarka:** eber

## ★ Musharaxiinta

**Kaliya Musharaxiinta**




### Andrea Kelly-Rosenbern

**Magaalada:** Portland, Maine
**Website:** *malaha*

*Musharaxu ma bixin macluumaad.*



### Devon Kraft

**Shaqada Hada:** Tababaraha Shakhsi ahaaneed, Takhasuska Caafimaadka Dabeecada
**Magaalada:** Jasiirada Peaks, Maine
**Website:** *malaha*

**War bixinta Shakhsiga:** "Anshaxa iyo shaqada wanaaga reer Maine waa mid dhaxal leh. Waxaan u socdaalayaa maalinteyda si aan ugu adeego dadka kale, waxaan seexanayaa anigoo u mahadinaya fursada aan helay maalintayda. Marar badan ayaan ka dayrin sida ay tahay "shaqo adag" hawl; Siday tahay ayaan u qabtaa."

**Khibradaha:** "Waxaan kasbaday badi khibrado aan u leeyahay aana hooyo leh laba caruur ah iyo xaaskiiisana aan ahay shaqaale maraakiibta ganacsiga oo inta badan guriga ka maqan. Waxaa kale oo aan heley xirfado hogaamin iyo dhiirigalin taasoo aan ka helay tababarka shakhsiga ah iyo milkiile ganacsi."

**Hadafyada:** "Waxaa jira hal keliya; si ay u fuliyaan rabitaanka dadka reer Jasiirada Peaks o oleh is garad."

# ★ Su'aasha 1 Portland

## Su'aasha:

*"Ma rabtaa in la sameeyo xarun adeega goboleed iyada oo la raacayo heshiiska dhexdhexaadinta ee Isbaheysiga waxbarashada weyn ee Greater Sebago, sida ay ansaxiyeen dhinacyada miisaaniyadaha iyo maamulaha Guddoomiyaha Waaxda Waxbarashada?"*

## ★ Waa maxay su'aashan macnaheedu?

Horaantii 2018, Dugsiyada Bulshada ee Portland waxay bilaabeen inay la shaqeeyaan iskuulada la deriska ah si ay u sameeyaan xarun adeeg oo guud. Waxay la gaareen heshiis isbahaysiga waxbarashada ee Greater Sabago iyagoo bixin doona iibsasho isbahaysi, horumarin xirfadeed, iyo hor u marinta xubnaha shaqaalaha. Illaa iyo hadda, 12 xarumo adeeg oo heer gobol ah, oo mid walba uu ka kooban yahay degmooyin badan, ayaa ka dhigtay jadwalka aasaasiga ah ee ay soo dejisay Wasaarada Waxbarashada ee Gobolka si ay ugu qalanto maalgelinta gobolka. Sida waafaqsan sharciga gobolka, xarun adeega gobolka waa inuu helo ogolaanshaha codbixiyaha.

### Doodaha **Haa**

- Wadashaqayntu waxay kordhin kartaa waxtarka waxayna hoos u dhigtaa sicirka alaabta iyo adeegyada dugsiyada degmooyinka. Waxay badbaadin kartaa lacagta mudo dheer.
- Isla wadaag tababar, dugsiyadu waxay kor u qaadi karaan xirfadaha macalimiinta si ay u wadaagaan hababka ugu wanaagsan ee horumarka.
- Dugsiyada Bulshada Portland waxay soo hoyn karaan $92,101 lacagaha laga helo gobolka. Hadii degmo ay diido inay kusoo biirto, xaruntu waxay wadi doontaa shaqadeeda inta kale eek u jirta isbahaysiga degmooyinka gobolka. Laakiin degmada ka baxday ma heli doonto qaar ka mid ah lacagaha laga helo gobolka ee dhinaca waxabarashada.

### Doodaha **Maya**

- Waxay daciifin doontaa maamulka dugiyasa
- Waxay cadaadis saari kartaa maaliyadaha dugsiyada degmooyinka si ay hore ugu socdaan.
- Waxay abuuraysaa hay'ad kale oo maamul leh iyada oo u shaqeyneysa shaqsiyaadka iyo danaha gaarka ah.

# ★ Su'aasha 2 Portland

## Su'aasha:

*"Magaaladu ma ka aqbali kartaa isbedelka xeer hoosaadka maqaalka IV, s 11, ee hoos ku qoran?"*

*"Marka lagu daro warbixinada looga baahan yahay musharaxiinta degmada ee ku yaala cinwaanka 21-A xeerka dib loo eegay ee Maine, 42 maalmood ka hor doorasha waa in la helo hordhaca warbixinta musharaxiinta kama dambayn 11:59 fiidnimo. Maalinta 42aad ee ka horaysa taariikhda doorasha guud waana in la dhamaystiro maalinta 49aad ka hor taariikhdaas."*

## ★ Waa maxay su'aashan macnaheedu?

Tani waxaa looga baahan yahay inay musharaxiinta golaha magaalada, gudiga iskuulka, iyo degmada biyaha ee Portland ay soo bandhigaan warbixin dheeraad ah oo muujinaysa lacagaha ay ka heleen musharax nimadooda iyo wixii kharash bixin ah 42 maalmood ka hor maalinta doorashada. Wakhtigan, musharaxiinta lama weydiiyo wax warbixin ahh bisha Luuliyo 1 iyo11 maalmood ka hor doorashada.

### Doodaha **Haa**

- Codbixiyayaasha doorashooyinka Portland ayaa fursad u heli doona inay bartaan meesha ay lacagta ka imaanayso si ay u helaan taageero musharaxiinta Portland
- Ogaanshaha meesha lacagtu ay ka imaanayso waxay caawin kartaa dadka inay fahmaan cida taageereysa musharaxa iyo sababta.
- Wax kabedel kani wuxuu u keenayaa Portland si ay ula socoto shuruudaha gobolka Maine ee musharixiinta heer goboleedka.
- Hada, musharixiinta degmooyinka waxaa looga baahan yahay inay muujiyaan deeq-bixiyeyaashooda 11 maalmood ka hor doorashada. Si kastaba ha ahaato, wakhtigaas codbixiyayaal badan ayaa horey u sameeyey codbixinta maqnaanshaha.

### Doodaha **Maya**

- Waxay ku noqonaysaa shaqo aad u badan musharixiinta. Musharixiintu waxay bixiyeen warbixin ku filan.
- Waxay ku tahay shaqo badan karaaniga magaalada
- Xeerka hada jira ee shaacinta ayaa ku filan.

**Doorka haweenka codbixiyayaasha gobolka Maine ee sanduuqa dhaqaalaha waxbarashadu waxay ka shaqeeyaan bararujinta iyo waxbarashada bulshada si ay u codbixiyaan.** Waa urur aan dawli ahayn una hawlgala inay dadweynaha baraan wixii ku saabsan codaynta:

- Waxaan dhisnaa ka qaybqaadashada dadweynaha iyo hab ku socda dimuquraadiyad.
- Waxaan qiimaynaa arimaha khuseeya bulshada ee muhiimka ah guud ahaan heerarka dowladeed anaga oon dhinac raacsanayn.
- Waxaan awood u siinaa dadweynaha in ay raadiyaan xalal wax ku ool ah oo ku saabsan arimaha siyaasada bulshada iyada oo loo marayo xaga waxbarashada iyo maareynta isku dhaca.

*Deeqaha Sanduuqa Waxbarashada LWVME, oo ah 501 (c) (3) urur, ayaa canshuur laga jari karo marka sharcigu uu ogolaado.*

**Doorka horyaalka haweenka codbixiyayaasha gobolka Maine:** Waa urur ka shaqeeya barashada siyaasada iyagoon dhinacyada siyaasiyiinta aan raacsanayn. Waxay dhiiri geliyaan ka qaybqaadashada arimaha dadlada, waxay ka shaqeeyaan sidii ay kor ugu qaadi lahaayeen fahamka siyaasada iyo arimaha saameeya siyaasada guud iyagoo isticmaalaya xaga waxbarashada iyo baraarujinta. Marna ma taageerno ama kama soo hor jeesano xibi ama musharax.

*Deeqaha Doorka Horyaalka Haweenka Codbixiyayaasha Maine canshuur laga jarayo.*

**Kusoo biir Doorka horyaalka haweenka codbixiyayaasha gobolka Maine internetka: lwvme.org/join.html**

*Horyaalku ma aha mid dumarka oo keliya! Qof kasta oo taageera hawlgalka Horyaalkan ayaa lagu soo dhaweynayaa inuu ka noqdo xubin.*

facebook.com/LWVME    @LWVME    @LWVME